noo sameeyey hab la hubo oo nabad ah uu baniaadmiga samada ku aadi karo.

Ilaah wuxuu na siiyey Inankiisa madiga ah, Isagu wuxuu ahaa Ilaaha weligiis jira, oo laakiin cunug ahaan ayuu ku dhashay oo ku yimid dunidan qaas ahaan dhulkaasi Israa'iil, muddo laga joogo ku dhawaan 2000 oo sanadood. Magaca loo bixiyeyna wuxuu ahaa CIISE magacaasi uu micnahiisu yahay BADBAADIYE maxaa yeelay wuxuu u yimid inuu aadanaha ka badbaadiyo dembiyadooda. Dhalashadiisa waxay ahayd mid muucjiso ah. Nolosha uu ku nolaa waxay ahayd mid asli ah oo aan inaba wax dembi ah lahayn. Wax bariddiisa iyo bogsintiisa waxay muujisay jacaylka iyo awoodda Ilaah. Wuxuu u dhintay inuu dumarka iyo ragga ka badbaadiyo dembiyadooda. Saddex maalimood dabadood wuu ka sara kacay dhimashada. Tani waxay ahayd caddeynta ugu dambeysay e lagu muujinayey inuu Ciise Masiix ahaa mid xagga Ilaah laga soo diray e loo soo diray inuu ahaado Badbaadiyaha aadanaha.

Sawirkan ugu dambeyo waxaan arkeyna in buundadii ay kaamilantay oo ragga iyo dumarka ay si sahal ah dhinaca kale ugu gudbayaan. Buundada waxay leedahay muqaalka skutalaabta maxaa yeelay, Ciise Masiix wuxuu ku kor dhintay iskutalaab geed laga hagaajiyey, Isagoo edbintii nala edbin lahaa garbaha u dhigtay. "Laakiinse waxaa Isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna" (Ishacyaah 53:5ba). "Oo Isagu dembiyadeennii wuxuu ku qaaday idhkiisii geedka saarnaa, si innagoo dembi kala dhimannay aynu xaqnimo ugu noolaanno. Waxaad ku nbogsateen xarijimihii karbaashiddiisii" (1 Butros 2:24). "Maxaa yeelay, Masiixba mar buu u xanuunsaday dembiyada. Isagoo xaq ah ayuu u xanuunsaday kuwa aan xaqa ahayn aawadood inuu inoo keeno Ilaah. Xagga jidhka waa laga dilay, laakiinse xagga ruuxa waa laga nooleeyey" (1 Butros 3:18), maxaa yeelay waa uun mid aan iin lahayn kan awooday inuu gudo deenta dembiilaha. Haddii aan iskutalaabta ku hoos imaano qalbi toobadkeen leh, waxaan cafis ku heleyna Ciise Masiix. Wuxuu inoo sameeyey waxaa lagu soo koobi karaya qoraalka Yooxanaa 3:16, "Ilaah intuu dunida jacayl u



qabay ayuu siiyey Wiilkiisa a keliya oo dhashay in mid kastoo Isaga rumaysta uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah". Mid kastoo dembiyadiisa ka toobadkeena oo aamina inuu Ciise yahay waddada keliya ee Ilaah xidhiidh lagula yeelan karo "wuxuu ka gudbaya dhimashada oo wuxuu u gudbaya nolosha". Taasi waa mid ajaacib ah! Ilaah wuxuu buundo u hagaajiyey dooxadii weyneyd taasi oo ku ahaatay dhimashada iyo sara kaca Ciise Masiix.

Qaybinta Qoraaladan waxaa sameysa ha'yad la yidhaahdo
DCL, Bernstrasse 73, CH-3613 Steffisburg, Switzerland
www.dclit.net / info@dclit.net
Waxaa turjumtay idaacadda Codka Wadada Nabadda
Asalka Qoraalkan waa CCL, Hong Kong
www.codkanabada.org / www.noloshacusub.net
2.2016
Somali

Buundada lagu gaaro Ilaah



Balalka ugu horeyaan ee Baybalka (Bilawgii Cutubka 2aad) waxaan akhrineyna sida uu Ilaah ku uumay Aadan iyo Xaawa, ninkii ugu horeyey iyo naagtii ugu horeysay. Waxay ku noolayeen beer aad u qurux badan, oo midda ugu sii wanaagsaneyd waxay ahayd jaalnimada ay Ilaah la lahayeen iyo sida ay Ilaah ugu dhowayeen. Laakiin Bilawgii Cutubka 3aad waxaan ka akhrineyna in dadkii la uumay ay Ilaah ku caasiyeen oo taasna waxay ahayd aasaaska dembiga. Maalintaas wixii ka bilaabato ilaa maanta qof walba wuxuu dhalanaya isagoo dembiile ah oo jaalnimadii hore ee Ilaah lala lahaa way burburtay. Ilaah waa nuur. Isagu waa Ilaah Quduus ah. Wax dembi ah ama mugdi ah oo Ilaah ku jira ma jiraan. Isagu waa asli, waa caadil waana xaq. Dhinaca kale markii la eegana waxaa cad in dadkii uu Ilaah uumay ay ku caasiyeen Isaga oo ay macaarad ku ahaadeen Ilaah iyo sharciyadiisa quduuska ah. Baybalka wuxuu leeyahay, “Laakiinse xumaatooyinkiinnaa idin kala soocay idinka iyo Ilaahiinna, oo dembiyadiinnaa wejigiisa idinka qariyey, oo saasuusan idiin maqlin” (Ishacyaah 59:2). Sida aad uga arkeysidba sawirka kowaad, qofka iyo Ilaah waxaa u dhexeysa dooxa aad u mool dheer. Kala soocnaantan waxay baniaadmiga ku dhalisay marxalad murugo badan oo ah mugdiga ruuxiyanka ah oo noloshu tahay mid aan macna lahayn oo ay farxad darro ka muuxdo. Taa keliya ma ahan e ilaa dooxada buundo loogu sameeyo, silac joogta ah iyo edbin iyo weliba xanuun aad u weyn oo loogu yeedho Gehena ama naar waa mid aan laga lexan karin. Laakiin qofka uu Ilaah uumay wuxuu aad uga cabsanaya carada Ilaah oo wuxuu doonaya sida uu uga fakan lahaa. Wuxuu rabaa inuu hubsado nolosha daa’imiga ah inuu helo, noloshaasi uu ku helayo farxad iyo raynreyn iyo nabad weligeed ah.



Waxaa halkan ka muuqata inuu baniaadmiga ku dadaalayo inuu sameysto buundo uu dooxada ku gudbo uu Ilaah ku gaaro. Alwaaxyada geedka waxay metelayaan dadaalka faraha badan e uu baniaadmiga sameeyo. Dadka qaarkood anshax wanaag ayey ku noolyihiin oo waxay ku dadaalayaan in hawla wanaagsan ku dhaqmaan. Waxay umaleynayaan inay hawlaha wanaagsan e ay sameynayaan Ilaah ku laalushayaan oo sidaa dembiyadooda looga cafinayo. Dadka qaarkiis wuxuu ku noolyahay cabsida ay ka qabaan sharka iyo ruuxyada sharka ah. Si ay uga samata baxaanna waxay ku dadaalayaan inay sadaqo iyo hadiyado kala duwan bixiyaan amaba waxay sameynayaan xafladaha ay diinta ogoshahay amaba tiirarka u ah. Qaarkoodna waxay ka soomayaan cuntada, cabitaanada iyo waxyaala kale; qaarkood kalena jirkooday goynayaan amaba way isgubaan oo waxay rajeynayaan inay sidaas dembidaaf ku helaan. Laakiin Erayga Ilaah wuu noo caddeeyey oo wuxuu leeyahay, “Sida qoran, Mid xaq ahu ma jiro midnaba” (Romans 3:10).



Alwaaxyada si kastoo renji loo mariyo ama loo qurxiyaba aad bay u gaaban yihiin oo ma noqon karaan buundo lagu gudbo. Ficilada wanaagsan e uu qofka sameeyo laguma helayo cafiska Ilaah amaba ma ahan hab Ilaah loogu dhowaan karo. Ilaah wuxuu Eraygiisa noogu sheegay inaan nahay sida tan, “Waayo, kulligayo waxaannu noqonnay sida wax aan nadiif ahayn, oo xaqnimadayada oo dhammuna waa sida dhar wasakh ah, kulligayona waxaannu u engegnay sida caleen oo kale, oo wumaantayadiina sidii dabayl oo kale ayay noo kaxaysata” (Ishacyaah 64:6). Ficiladaasi ma qabaan wax awood ah oo Ilaah naguma dhoweyn karaan. Tan kale, sharuudooyinka diinta e lagu ficiltamo waa wax ka baxsan qalbiga dadka oo waxba kama bedelayaan qalbiga dembiilaha ah e ku jira qofka. Midda kale, xataa adkeynta iyo ficilgelinta sharciyada dhaqanka horseedka u ah buunda uma noqonayaan xidhiidhka qofka iyo Ilaah u dhexeya amaba kama badbaadin karaan qofka edbinta weligeed ah iyo silaca joogtada ah. Baybalka wuxuu leeyahay, “Waxaa jirta waddo dadka la qumman, laakiinse dhamaadkeedu waa jidadkii dhimashada” (Maahmaahyadii 16:25). Ma jiro qof dadaalkiisa ku sameysan karo buundo uu ugu tegi karo Ilaah.

Sawirkan wuxuu muujinaya in jacaylka uu Ilaah dadka u qabo awgeed uu buunda aan dembiga kaga tallaabsano na siiyey. Ilaah ma rabin inuu baniaadmiga baaba’o sababtaas awgeed wuxuu